


Waxtarka Xoolaha



Fasalka 4aad, Heerka 4a, Toddobaadka 7

Grade 4, Level 4a, Week 7

AF-Somali

Waxtarka Xoolaha

Diyaariyaha: Cabdicasiis Maxamed Aden

Tafatiraha: Maxamed Axmed

Idilbile: Niguso Mekonnen

Buuggaan waxaa maalgaliyay hayada RTI. Waxaana iska kaashaday diyaarintiisa Wasaarada Waxbarashada Federalka iyo Xafiiska Waxbarashada heer deegaan. Waxaana diyaarintiisa fududeeyay hayada SIL LEAD

AF-Somali

Ethiopia




<http://creativecommons.org/licenses/by/4.0/>

You are free to make commercial use of this work. You may adapt and add to this work. You must keep the copyright and credits for authors, illustrators, etc.

Cutubka kowaad

Dhaqashada Xoolaha



Dhaqashada xoolaha ayaa ah mid si wayn dunida looga dhaqmo. Waana mid sii gaar ah deegaanka soomaalida Itoobiya uga jirta. Waana isha dhaqaale ee fac ka fac awawyaasheen ay ku noolaan jireen. Waxaana xusid mudan inay maanta qayb wayn ka tahay nolosheena iyo dhaqan keena.

Dhaqashada xoolaha ayaa ah mid wakhtiyo badan soo martay ilaa intii ay jirtay.

Dhaqashada xoolaha ayaa waxay maanta meelo dunida ka mid ah maraysa in qaab casriyaysanoo cilmiyaysan xoolaha loo dhaqdo. Waxaana meelahaasi la adeegsadaa teknolojiyad iyo aalado casri ah.

Dhaqashada xoolaha waxay ka kooban tahay qaybo kala duwan. Waxaa qaybaha kala duwan ka mid ah quudinta xoolaha. Quudinta xoolaha waa inay dalaga, doog iyo biyo helaan. Waxa kale oo ay dhaqashada xooluhu ka kooban tahay koriinkooda, tarankooda, talaalkooda ama dawayntooda iyo maamulkooda.

Sidoo kale dhaqashada xoolaha waxa la xidhiidha maaraynta waxa so saarkooda. Waxaa in la mareeyo ubaahan lisidda caanahooda, kaa faa'iidaysiga haraga iyo intifacida hilibkooda.

Waxa jira warshado badan oo casri ah oo uu wax soo saarkodu la xidhiidho xoolaha. Tanina waxay ka dhigan tahay in la'aantood badeeco badan oo maanta faa'iido badan laga helo ay san jirilahayn. Waxaa dhaqashada xoolaha saamayn adag ku leh isbadalka cimilada.

Roobka badan oo biyaha iyo baadkaba kordhiya ayay xoola dhaqatadu si aad ah uga manaafacaadsadaan. Nimcada iyo baarwaqada Eebe siiyayna dadka aad ayay ugu mahadceliyaan. Mararka qaar waxa dhacda in abaar ba'an dhacdo. Waxay abaartaasi galaafataa nolosha tiro badan oo xoolo ah.

Xiligaas oo kale waxay xoolo dhaqatadu aad ugu mashquulaan baddbadinta xoolahooda. Waxana dhacda xiliga abaarta ah inayna ka helin wax faa'iido ama intifaac ah.


Waxa caalamka laga dhaqdaa xoolo kala duwan oo dabjoog ah. Waxaa xoolaha ka mid ah: geela, lo'da, adhiga, fardaha, dameeraha iyo kuwo kale. Waxay dadka qaar intaa u dheer oo ay dhaqdan ayda.

Xoolaha ayaa ah kuwo si aad ah dunidu ugu tiirsan tahay. Waxaanada taas ku garan kartaa sida aadka ah ee uu dalabkoodu u sareeyo. Waxaa kale oo taa ku garan kartaa sida ay warshado badan ugu tiirsan yihiin.

Dhaqaaqa ganacsiga ayaa sidoo kale ah mid aad looga xiiseeyo xoolaha. Waxayna u muuqataa in maalinba maalinta ka danbaysa baahida xoolaha loo qaabo ay sii kordhayso.

Cutubka Labaad

Xidhiidhka ka dhexeya bulshada iyo xoolaha aan dhaqano



Bulshada deegaankeena inteeda badan waa xoolo dhaqato. Waxay noloshoodu ku tiirsan tahay xoolaha aan dhaqano. Waxaa xoolaha iyo bulshada u dhexeeya xidhiidh qoto dheer.

Waxay xaalada bulshadu ku xidhnayd xoolaha ay dhaqdaan. Waxay bulshadeenu u baadan tahay reer guuraa. Waxay ahayeen dadku kuwo kolba dhinaca xoolaha ulaa guura. Waxaa loo guuri jiray hadba halkii roob leh.

Waxaa xoolaha laa gayn jiray halkii baad iyo biyo looga heli karo. Marka uu baadkaasi ka gabaabsadana waa loo sahan tagi jiray. Halku sahanku roob ku sheego ayaa xoolaha iyo reerahaba loo raari jiray.

Wali bulshadeenu waxay u badan tahay reer guuraa. Waxay inteeda badan bulshadeenu dhaqdaan xoolaha. Waxay wali bulshadeenu hadba meel ula guurtaa xoolaha ay dhaqdaan. Reer guuranimadu waxay meesha ka saartay xuquuqo badan oo u qoysku laha

. Waxay qoysaska reer guuragu ka fikiraan oo kaliyaha siday xoolahooda baad iyo biyo ugu heli lahayeen. Caruurta qoysaska reer guuraga ah maa helaan wax waxbarasho ah iyo Caafiimaadtoona.

Reer guuragu kama fikiraan naftooda iyo ubaadkooda toona. Waxa kaliya oo aad ay u ilaaliyaan xoolahooda. Waxay ahmiyada koobaad siyaan xoolaha ay dhaqadan. Inkastoo ay nolosha reer guuragu ku tiirsan tahay xoolaha hadana waxa dhacda inay ku qabaan dhibaatooyin badan.

Waxay had iyo jeer ku mashquulsan yihiin arimaha la xidhiidha xoolahooda. Dadka xoolo dhaqatada wakhtigooda ugu badan waxay galiyaan xoolaha. Waxay hadaba dawlada deegaanka somaalida sanadahan danbe xooga saartay siday kor ugu qaadi lahayd nolosha reer guuraaga.

Waxay dawladu bilawday barnaamijyo wax lagaga badalayo nolosha xoolo dhaqatada reer guuraaga. Waxay dawladeenu bilawday barnaamij dib u dajin loogu samaynayo reer guuraaga. Waxaa barnaamijkan dib u dajinta lagu caawiyaa dadkena xoola dhaqatada ah.

Waxay dawladeenu go'aansatay siday isbadal muuqda ugu samayn lahayd dadka reer guuraaga ah. Waxay dawladu qaadatay jaha sax ah oo mudo yar gudohood isbadal muuqda keentay. Waxay dawladu qaadatay barnaamij dadka xoolo dhaqatada ah loogu badalayo xoola dhaqato beeraley.

Taaso ah barnaamij dib u dajin loogu samaynayo bulshada reer guuraaga ah. Waxay hadda dawladu dajisay qorshihi barnaamijka lagu hirgalin lahaa. Waxaana la isla qaatay in khayraadka wabiyada ee aan hodanka ku nahay loogaa faa'iideeyo bulshadeena.

Waxaa la go'aamiyay in xoola dhaqatada dib u dajin loogu sameeyo dhulka wabiyda hareerahiisa ah. Waxay markii hore dawladu u sii dajisay waxyaabaha aasaasiga u ah nolosha aadamiga.

Waxay dawladu u diyaarisay intayna soo dajiniin dadka, hoygii, iskuulkii, goobti caafimaadka, beerti iyo matooradi biyaha. Kadib ayaa dib u dajinti qoysaska reer guuraaga ah la bilaabay. Waxaa kalo qoysaska ay ka sii horeeyay khabiiradi ka caawin lahaa dhanka beerashada dalaga.

Waxaa qoys kasta la siiyay matoor ay beerta ku waraabsadaan. Waxay caruurtoodii heshay fursad waxbarasho oo dusigu agtooda yahay. Waxay heleen xarun caafimaad o iyaga u gaar ah.


Waxay isku garab wadeen falashada beertooda iyo waliba dhaqashada xoolahooda. Waxay fursad u heleen inay dhaqdaan xoolahooda si ay awal u dhaqanayeen si ka fiican iyagoon guur guurin. Bilowgi hore ee barnaamijka dib u dajinta ma aynan fahansanayn bulshadi reer guuraaga ahayd.

Balse mudo yar gudaheed waxaa markiiba muuqata noqotay isbadalkii nololeed ee ay qoysaski lagu bilaabay heleen. Kadib, waxay bulshadi reer guuraga ahaa ogaadeen inay dib u dajintu waxtar balaadhan u leedahay.

Wuxuuna barnaamijka dib u dajintu noloshoodi kor u qaaday qoysas aad u tiro badan. Kuwaasoo loo badalay xoolo dhaqato beeralaa

Cutubka 3aad

Faa'iidada Xoolaha



Xooluhu waa xayawaanka guuri joogta ah ee dadku dhaqdaan. Xooluhu waxay faa'iido badan u leeyihiin dadka. Dadkeenu waxay xoolaha uga faa'iidaystaan siyaabo badan. Waxay dadkeena xoolo dhaqatada ubadan noloshoodu ku tiirsan tahay xoolaha.

Guud ahaan xooluhu waa xayawaanka adamuhu dhaqdaan. Waxa la cunaa hilibkooda. Waxa la cabaa caanahooda. Waxa kalo loo adeegsada xoolaha gaadiid ahaan.

Xoolaha qaarkood waa la rarta ama laa fuulaa. Waxay dadka reer guuraaga ah ku guuraan xoolaha marka ay goob kale u guurayaan. Waxaa xoolaha qaarkood loo isticmaalaa falashada beeraha.

Sida caadiga ah erayga xoolo waxaan u isticmaalaa xayawaanka gurijoogta ah. Lakiin waxaa guud ahaan loo yaqaanaa xayawaanka dadku dhaqan karaan. Kuwaaso loo isticmaalo cunto ahaan, xarrago iyo rarasho.

Xoolaha dadkeenu aad ka u dhaqdo waxa ka mid ah, geela, lo'da iyo adhiga. Waxay bulshadeenu aad u jecel yihiin geela. Waxaa deegaankeena aad looga dhaqdaa geela. Wuxuu deegaankeenu ka mid yahay deegaanada geeska Afrika ugu horeeya dhanka dhaqashada geela.

Waxay bulsheednu qiimo gooni ah siisaa geela. Wuxuu geelu leeyahay faa'iidooyin fara badan. Waxaan cunaa hilibkiisa. Waxaan cabnaa caanihiisa. Geela waxaan u adeegsana gaadiid ahaan.

Waxa kale oon geela ka helaa dhaqaale marka la iibgeeyo. Waana xoolo dhaqaan ahaan aad aan u qadarino. Geela waxan ubixinaa yarad ahaan marka aan guursanayno. Geela waxa loo bixiyaa xaalmarin marka u khilaaf ama isku dhaca yimaado.

Bulashada soomaalidu waxay geela u kala qaadataa mag ahaan. Geelu wuu ka hawl badan yahay xoolaha kale. Geela waxa raaca oo hawshiisa adag ka soo bixi kara ragga. Geela wuxuu daaqaay kaymaha waa wayn ee ka fog reeraha.

Geelu badanaa uma soo hoydo reeraha oo wuxuu ka maqnadaa mudo dheer. Geela wuxuu uu hoydaa hadba halka uu gabalku ugu dhaco. Geela waxa xeero looga sameeya habeenba meesha u joogo.

Geela waxa raaca geel jiraha. Waxa inta badan geel jiraha la socda oo caawiya wiil ka da' yar. Waxa wiilka loo yaqanaa dabadhoon. Wuxuu geelu kaga duwan yahay xoolaha kale waxyaabo badan.

Waxaa ka mid ah waxyaabahas aadka ugu adkaysanayo biyo la'aanta joogi karo muddo dheer. Geelu wuxuu mogaan kara mudo ka badan bil ama 30 maalmood. Geelu wuxu aadkaysi badan uu leeyahay abaaraha.

Geelu xoolaha kale sida lo'da iyo adhiga waa uga adkaysi badan yahay abaaraha. Geelu wuxuu ku dhala ilmaha mudo ka badan tan xoolaha kale. Geelu wuxuu ku dhala mudo 12 bilood ah.

Waxay bulshadeenu geela u tirisay suugaan badan oo ay ku amaanayaan geela. Waxay sugaantaa ku caddeyaan qiimaha uu geelu xagooda ka leeyahay. Waxay ku caddeyaan inta u dhanyahay jacaylka ay geela u qaban.



Waxaad halka ka garan kartaa sida u geelu uga qiimo badan yahay xoolaha kale. Waxay bulshada qayb kamida dhaqataa adhiga iyo lo'da. Bulshada adhiga iyo lo'da dhaqata waxay degaan goobaha cawska iyo biyaha leh. Waxay lo'da iyo adhigu geela kaga duwan yihiin u adkaysi la'aanta abaaraha.

Lo'da iyo adhiga waxa laga helaa hilib,
caano iyo subag. Mararka qaar waxa loo
adeegsadaa lo'da qodashada beeraha.
Waxa laga hela dhaqaale marka la iibgeeyo.

Waxaan halkaa ka garan karnaa in
bulshadeenu tixgalin iyo mudnaan badan
siiso geela. Waxaa dhici jirtay in ninba
ninka u ka geel badan yahay looga ixtiraam
badanaa.

